



## BAAQ NABADEED

### GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA AQALKA SARE

Guddiga Joogtada ah ee Golaha Aqalka Sare wuxuu ku guddoonsaday kulankiisa 12<sup>aad</sup> Kalfadhiga 4<sup>aad</sup> ee maanta oo ay taariikhdu tahay **29 Dec. 2018**

**ISAGA OO KA XUN:** dagaalka ka socda deegaannada hoostaga Degmada Maxaas ee Gobolka Hiiraan iyo dagaalka ka socda ka-xandhaale ee gobolka Galguduud.

**ISAGA OO XOOJINAYA:** nabadgelyada iyo wada-noolaanshaha Dadka Soomaaliyeed meel kasta ay joogaan.

- Wuxuu ugu baaqayaa Beelaha Soomaaliyeed ee walaalaha ah ee ku dagaallamaya deegaannada kor ku xusan in ay joojiyaan colaadda ka dhex taagan kuna wada noolaadaan nabadgelyo iyo deris wanaag, iyaga oo dhowraya xeerarka iyo faritaannada Diinta Islaamka.
- Wuxuu ugu baaqayaa mas'uuliyiinta, cuqaasha, odayaasha dhaqanka, culumaa'u diinka iyo ururrada Bulshada ee dowlad goboleedyada Hirshabelle iyo Galmudug in ay si degdeg ah u soo farageliyaan dagaaladaas si loo joojiyo colaadda ka soo cusboonaatay deegannada kor ku xusan, taas oo sababtay dhimasho, dhaawacyo, barakac iyo burbur hantiyeed.
- Wasaaradda Amniga, wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalaynta iyo dib u heshiisiinta Xukuumadda Federaalka, waxaa lagu wargelinayaa in ay ka shaqeeyaan sidii loo soo afjari lahaa colaadahaas ka socda deegaannada kor ku xusan.

=DHAMMAAD=